

Nolol maalmeedka da'yarta ee interetka: siddeed talo oo kaa caawinaya in aad qayb weyn ku yeelato

Talooyinkani waxa ay xoogga saarayaan sidii adigu waalid ahaan/qof weyn ahaan aad si wanaagsan ugula socon lahayd waxa ay carruurta ka sameeyaan internetka. Booqo bogag badan oo talo kaa siinaya haddii aad warbixin ka rabto tusaale ahaan difaaca fayraska iyo noocyada kala duwan ee barjaamijyada wax kala shaandheeya. Xidhiidhka ururada iyo bogagga ka hadla arrimahaas waxa aad ka helaysaa tusaale ahaan haddii aad raadiso halkan www.surfalugnt.se.

1. Wakhti yar sii maalin kasta in aad ilmahaaga kala hadasho wax internetka ku saabsan.

Ula hadal si la mid ah sida marka la waydiinayo wixii iskuulka ka dhacay, ciyaartii ama markii ay debedda joogeen ee ay bannaanka ku ciyaarayaan. Carruur badan oo maanta joogta waxba uguma kala duwana in kombiyuutarka lagu kulmo iyo in toos loo kulmo.

2. Ku dhiiro in aad qof weyn noqoto oo aad xad dejiso.

Marna uma fiicna carruurta in ay kombiyuutarka isticmaalaan wakhti dheer ama ay booqdaan bogagga ay ku jiraan waxyaalo dareenka kicinaya. Gaar ahaan haddii ay shaqadii iskuulka dhaawacayso ama caafimaadka jidh ahaaneed. U deji xuduud wakhtiyeed oo cadcad haddii aad u aragto in ilmuhu internetka galo wakhtiyo dhaadheer ama badan. Ka hadal haddii aad u aragto in ilmuhu galo bogag waxa ku jira aanad u arag inay habboonyihiin.

3. Ku dhiiro in aad faduuli noqoto!

Waydii sida walxuhu u shaqeeyaan. Carruurta waa khubaro, waanay rabaan in ay muujiyaan kartidooda. U ogolow in ay ku tusaan bogagga ay jecelyihiin booqashadooda iyo qaybaha ay ka helaan kuwa ay yihiin.

4. Adiga laftaadu baro.

Hadba dhawr daqiiqo sii in aad rogrogto bogagga dhalinyarada ee kala duwan si aad u aragto sida ay u eegyihiin. Sidaas ayaad fahan weyn ugu yeelanaysaa sida xaalka ilmahaaga ee internetku u eegyahay. Akhriso qoraallada ku saabsan dadka leh bogagga iyo sida la yeelayo haddii la rabo in la ashkateeyo. Sidaas ayaad diyaar ugu noqon kartaa haddiiba ay wax qaldamaan.

5. Deji shuruuc aad isla ogtihiin.

Kala hadal ilmaha inta uu leeganayo wakhtiga uu ku jiro internetka. Waxa dhici karta in ilmuhu fikir ka haysto dhererka wakhtiga habboon. Sidoo kale kala hadal warbixinaha isaga/iyada ku saabsan ee ay caadiga tahay in ay faafiyaan. Khatar maaha in qofku sawiradiisa geliyo internetka laakiin waa in si aad ah looga fikiro cidda sawirka loogu talo galayo in ay aragto.

6. Caawimo ka geyso ashkatada haddiiba ay wax dhacaan.

Haddii ilmaha wax dhibaato ahi ka soo gaadho internetka, ha noqon qof ceebayn badan. Dhegayso sheekada ilmaha, una ogolow in uu ku tuso wixii dhacay, si adiga laftaadu aad

sawir fiican uga qaadato dhacdada. Mar walba ashkatee! Bogagga internetka badankooda waxa ku yaal meel laga gudbiyo ashkatada. Meeshaasi waxay caadi ahaan ku yaallaa xagga ugu hoosaysa bogga, waxana ku qoran "anmä" ama "abuse". Haddii dambiiluhu ka ag dhawyahay ilmaha oo tusaale ahaan ay isku iskuul joogan, waxa fiican in aad iskuulka gaadhsiiso wixii dhacay. Coominta (mobbing) iyo cadaadinta internetku waxay inta badan xidhiidh la leedahay xaalka iskuulka ama fasalka.

7. Noqo tusaale wanaagsan.

Isku day in aad u dhaqanto sida aad barayso marka laga hadlayo internetka. Haddii la rabo in ilmuhu si ugu dhaqmo internetka, waxa fiican in adiga qudhaadu aad raacdo shuruucda aad dejisay.

8. Goobjoog ahaw.

"Si aad joobgoog" u ahaato, uma baahnid in aad gasho dhammaan bogagga internetka ee uu imuhu booqday. Waxa mararka qaarkood kugu filan in aad fahanto waxa ay ka hadlayaan. Markaa waa ay kuu fududahay in aad la joogto marka ay ka hadlayaan waayo-aragnimadooda, kuwa fiican iyo kuwa xunba. Goobjooge ayaad ahaan kartaa marka wax qaldamaan ee ay caawimo u baahanyihiin. Ama waxa aad u ahaan kartaa sidii qof weyn oo internetka goobjoog ka ah.